



# **Berito oo (Khamiis ah, Febraayo 11): Dhismayaasha PPS Waa Xirnaan Doonaan Laakiin Waxbarashadii ay Ardaydu Guryaha Ku Qaadaneeyeen Waa Sii Socon doontaa**

Febraayo 10, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Foojinaan iyo taxadar fara badan awgeed waxaa la saadaalinayaa inuu baraf ka di' doono magalaada Portland iyo nawaaxigeeda, haddaba dhammaan dhismayaasha PPS waa ay xirnaan doonaan berito oo Khamiis ah bisha Febraayo tahay 11, 2021. **Waxbarashadii ay ardaydu dhinaca online ah ku qaadaneeyeen iyaga oo jooga guryahoodu waa sii socon doontaa sidii loogu talagalay ee jadwalka macallimiinta iyo ardayda ahaa.**

Inta ay dhismayaasha PPS xiran yihiin:

- Dhammaan waxaa la joojiyey hawlihii **Waxbarashadii qofka ahayd ee koobneyd.**
- **Waxaa la baajiyey Daryeelkii Caruurta** ee dhismayaasha PPS.
- **Waxaa kale oo la baajiyey tababaradii ciyaaraha** ardayda dugsiyada sarre.
- Waxaa xirnaan doona barnaamijka cuntada lagu bixiyo ee SUN.
- Waxaa la baajiyey dhammaan hawlihii kale ee ku salaysnaa iskuulka.
- Waxbarashadii ay ardaydu guryaha ku qaadaneeyeen waxay u sii socon doontaa sidii jadwalu ahaa.

Waxaan la socon doonaa saadaasha hawada, iyada oo aan idinla soo xiriiri doono sida ugu degdeg badan qorshayaasha ku saabsan maalinta Jimcaha ee aan awoodno. Waad mahadsan tihiin sidoo kale fadlan waxaan idiin rajeyneynaa nabadgelyo.